

Warbixin iyo Macluumaadka Magaalada Minneapolis Fadlan Wac 311 (Call 311 for Minneapolis Information and Services-Somali)

Cawimaad ka hel tirade 311 adiga Oo isticmaali bogga internet-ka

www.minneapolismn.gov/311

Si toos ah ayaad u dalban kartaa Macluumaadka Magaalada Minneapolis adigoo isticmaali bogga internet-ka ee magaalada. Haddii ay tahay warbixin rinjiyeen sharci daro ee hanti (graffiti), samayn nalka iftiimiya jidka oo gubtay, ama samayn waddo burburtay, waxaad si sahal ah warbixin ku gudbin karta adigoo wacaayo tirada 311. Marka aad macluumaad codsatid adigoo isticmaal shabakada internet-ka, waxaad heli doontaa tiro tixraac ah ood kala xiriir kartid mark aad wacdid 311 si aad u ogaatid talaabada laga qaaday codsigaaga.

Eapo

Wac311 Macluumaadka iyo

Hawlaha Magaalada

Tiradan 311 waxaa laga soo wici karaa meel kasto oo Magaalada Minneapolis ka tirsan- Xitaa waxaa laga soo wici karaa taleefonka gacanta. Dadka degan magaalada iyo dadka magaalada soo booqdayba waxaa ay wici karaan 311 marka ay ubaahdan cawimaad anaan ahayn deg deg ee macluumaadka Magaalada.

Xafiiska Shaqaaluhu wuxuu furan yahay

7-bada subaxniimo ilaa 7-bada fidniimo

(7 a.m. – 7 p.m.), Isniin-Jimco

Gargaarka deg dega ee aanan

Nafta halis gelinayn Wac 311

Qof kasto wu garan in tirada 911 la waco marka ay dhacaan arriimaha deg dega ah. Hadda waad garan in la waco tirada 311 marka ay dhacaan arriimo deg deg ah ee aanaan nefta halis gelinayn, kuwaas oo ay ka mid yihiin baabur la jabsaday, bur-burin hanti, xatooyo, iyo hanti luntay. Marka aad wacdid tirada 311 adoo gudbin warbixin ku saabsan arriin aanan deg deg ahayn, waxaad shaqada u sahli hawlaha tirada 9-11 ee gurmada deg deg ee Magaalada Minneapolis.

Wac 9-1-1 marka u socdo dambi waqitgaas xaadirka ah ama arriin caafiimaad ee u baahaan gurmada deg deg ah..

Wac tirada 3-1-1 dhamaan arriimaha khuseeya dhacdooyiinka anaan nafta halis gelinayn

Tusaaloyiinka macluumaadka Tirada 3-1-1 loo wici karo:

Maamulka Xanaanada Xoolaha

Warbixin xayawaan baadi ah,, shati xayawaanka rabaayada ah,, qaniinyo xayawaan, iyo cabasho dhawaaq ey.

Dhinaca waddada ee dadku maro & Jidadka Gaadidka

Wado xirid ama gooyin sharci daro ah, baraf xaaqid ama biyo fadhiyo,, warbixin ranjiyeen hanti oo sharci daro ah, calaamadaha jidadka ee kala haga socodka baaburta, & nalalka waddada ee baaburta kala haga, qashin jidadka yaal, xaaqitaanka jidadka, iyo waddooyin jajabay

Xaafad Degaan

Macluumaadka guryaha la degan yahay, warbixin calaamadaha olole (campaign signs), warbixin caws dheeraday, macluumaadka kala xadaynta meelaha xaafadaha (zoning information), qaadida qashinka iyo alaabta dib loo warshadeeyo, iyo macluumaadka ku saabsan ka hortaga la wareega guryaha deynta loogu jiro.

Maamulka Magaalada

Macluumaadka Xubnaha Guddiga iyo Xaafad Maamuleedka (ward), doorashooyinka iyo Shaqooyinka Magaalada ka furan

Guwaarida iyo & Safrida Nawaaxiga ee Joogtadah

Warbixinta gaadidka laga guuray ama la dayacey, warbixinta baaskiilka, arriimaha ku saabsan qalabka cabbira dhigashada gaadiidka (parking meter) iyo ilaalinta socdaalka baaburta & fulinta sharciyada

Warqada fasaxa iyo codsiga shatiga

Arriimaha khuseeya ganacsiga ama shatiga ganacsiga, warqada ogolaashada isticmaalka wadada, dib u-hubinta qorshe dhismaha, iyo codsi kormeere

Biyaha iyo Biya Marinka

Isticmaalka dhuunka biyaha laga jiido ee dhulka ku rakiban (hydrant), arriimaha khuseeya qashin qaadaha dhulka hose mara, biya marinka, iyo macluumaadka bixinta qiimaha isticmaalka biyaha (utility billing information)

Tirida 311 wa telefoon lacag la'aan ah

Waciitaanka tirada 311 wa lacag la'aan dhamaan gudaha Magaalada Minneapolis. Laakin waxaa laga yaabaa hay'adaha qaarkod ee telefoonka gacanta in ay daqiiqado qofka ku dalacaan. Qofku marka u wici 311 isagoo isticmaali taleefonka dadweynaha ee lacagta lagu dirsado, qofku wa in u lacagta iska bixiya.

Hadii aad ka soo waceysid meel ka baxsan Magaalada Minneapolis, waxaad la soo xiriir kartaa 311 adigoo wacaayo 612-673-3000.

Haddi aad u baahatid warbixintan oo qaab kala ah, fadlan wac 612-673-2162 ama e-mail u dir Minneapolis311@minneapolismn.gov.

Ogow: Haddi aad leedahay su'aalo ku saabsan macluumaadkan fadlan wac 311.

Attention: If you have any questions regarding this material please call 311.

Hmong: Ceeb toom. Yog koj xav tau kev pab txhais cov xov no rau koj dawb, hu 612-673-2800.

Spanish: Atención. Si desea recibir asistencia gratuita para traducir esta información, llama 612-673-2700.

Somali: Ogow. Haddii aad dooneyso in lagaa kaalmeeyo tarjamadda macluumaadkani oo lacag la'aan wac 612-673-3500.

Magaalada Minneapolis
Xiriirka 311

3000 Minnehaha Ave. S.
3rd Floor, 3rd PCT
Minneapolis, MN 55406

311

612-673-3000

Fax: 612-673-5970

TTY/TDD: 612-673-2157

Email: Minneapolis311@minneapolismn.gov